

Warbixin kooban

Dhammaan qeybaha Tusaha Sicirka Badeecadaha (TSB) bishii Oktoobar 2024 ayaa gaaray 151.96, marka la barbardhigo 151.39 bishii Sebteembar 2024.

Isbedel bileedka, Oktoobar 2024, marka la barbar dhigo Sebteembar 2024, ayaa sare u kacay 0.37 boqolkiiba. Sare u kaca ugu badan ee billaha ahi ayaa ahaa **Isgaarsiinta** (25.81 boqolkiiba) iyo **qalabeynta iyo dayactirka guryaha** (2.46 boqolkiiba). Sare u kaca **isgaarsiinta** ayaa inta badan ka yimid qiimaha Teefoonada & Agabka Telefax (+30.58 boqolkiiba). Sare u kaca **qalabeynta iyo dayactirka guryaha** ayaa inta badan ka yimid qiimaha qalabka guryaha sida roogaga 3.48 boqolkiiba.

Guud ahaan, sicir bararka 12kii bilood ee la soo dhaafay Oktoobar 2023 iyo Oktoobar 2024 (heerka sicir bararka), dhammaan qeybaha TSB ayaa sare u kacay 5.83 boqolkiiba, marka la barbardhigo 5.33 boqolkiiba 12kii bilood ee la soo dhaafay Sebteembar 2023 iyo Sebteembar 2024.

Shaxda 1: Tusaha Sicirka Badeecadaha; Oktoobar 2024 (Dec 2014 = 100)


Tusaha Sicirka Badeecadaha, Oktoobar 2024	
Tusaha bishan (Oktoobar 2024)	151.96
Tusaha bishii hore (Sebteembar 2024)	151.39
Tusaha sanadkii hore (Oktoobar 2023)	143.59
Isbedelka bilaha ah boqolkiiba %	0.37%
Isbedelka heerka sicir bararka sanadlaha ah boqolkiiba %	5.83%

Heerka sicir bararka marka loo eego TSB-da

Tixraca TSB-da

Isbedelka boqoleyda ee 12 billood

Index = 100 @ December 2014



Isha Xogta: NBS

War bixin bileedka bisha **Oktoobar 2024** (TSB) iyo faahfaahinta xili waqtiyeedka xogta ayaa lagu baahiyaa, websiteka Agaasinka <http://www.nbs.gov.so> Twitter: @NBS_somalia

Tusaha Sicirka Badeecadaha (TSB) Oktoobar 2024

Guud ahaan heerka Sicir Bararka: Dhammaan Qeybaha TSB, Oktoobar 2024

Heerka sicir-bararka bisha Oktoobar 2024 waa isbedelka boqolleyda ee Tusaha sicirka badeecadaha (TSB) 12kii bilood ee la soo dhaafay, Oktoobar 2023 iyo Oktoobar 2024.

Dhammaan qeybaha TSB ayaa sare u kacay 5.93 boqolkiiba 12kii bilood ee la soo dhaafay, Oktoobar 2023 iyo **Oktoobar 2024**, marka labar bardhigo 5.33 boqolkiiba 12kii bilood, Sebteembar 2023 iyo Sebteembar 2024.

Dhammaan qeybaha TSB isbedelka billaha ah ee Oktoobar 2024 ayaa sameeyey sare u kacay dhan 0.37 boqolkiiba.

Guud ahaan heerka sicir bararka: qeybo ka mid ah badeecadaha, Oktoobar 2024.


Heerka sicir bararka qeybaha **cuntada iyo cabitaanada** iyo **guryaha, biyaha, korontada iyo gaaska** ayaa ah kuwa ugu saameynta badan badeecadaha oo dhan looguna isticmaalka badan yahay **dhammaan qeybaha TSB-da**.

Cuntada iyo Cabitaanada ayaa qiimahooda bilaha ahi sare u kacay -0.89 boqolkiiba, bishii Oktoobar 2024 marka la barbardhigo hoos u dhac gaaraya -1.11 boqolkiiba bishii Sebteembar 2024. Tani ayaa sababtay in qaar ka mid ah cuntada qutul daruuriga ah uu qiimahoodu sare u kaco. Sicir bararka sanadlaha ah ayaa sare u kacay 0.60 boqolkiiba bishii Oktoobar 2024. marka la barbardhigo sicir bararka sanadlaha ah oo gaaray -0.15 boqolkiiba Sebteembar 2024.

Guryaha, Biyaha, Korontada iyo Gaaska ayaa sare u kac bille ah sameeyey -1.29 boqolkiiba ee bishii Oktoobar 2024. Sicir bararka sanadlaha ah ayaa hoos u dhacay -3.05 boqolkiiba Oktoobar 2024. Tan ayaa imaanaysa marka la barbardhigo sicir bararka sanadlaha ah oo gaaray 3.37 boqolkiiba ee Sebteembar 2024.

Dhammaan qeybaha TSB-da & qeybaha laxushay

Index = 100 @ December 2014




Isha Xogta: NBS

A. Qeybaha ugu weyn ee isbedelka Sanadlaha ah (TSB)

War bixin bileedka bisha **Oktoobar 2024** (TSB) iyo faahfaahinta xili waqtiyeedka xogta ayaa lagu baahiyaa, websitaka Hay'adda Istaatistikada Qaranka Soomaaliya. <http://www.nbs.gov.so> Twitter: @NBS_somalia

Jaantuska 1: Sicir bararka sanadlaha ee dhamaan qeybaha; Oktoobar 2024(Dec 2014 = 100



Qeybaha ugu weyn ee sicirkoodo Kordhay (+):

- **Isgaarsiinta** ayaa sameeyey sare u kac sanadle ah 81.63 boqolkolkiiba bishii Oktoobar 2024. Sare u kaca ugu badan ayaa ka yimid qiimaha telefoonka iyo qalabka telefax (+104.34 boqolkiiba).
- **Maqaayadaha & Hoteelada** ayaa sameeyey sare u kac sanadle 37.21 boqolkiiba bishii Oktoobar 2024. Sare u kaca ugu badan ayaa ka yimid Hoteelada (+52.49 boqolkiiba).
- **Hawo Bedeleshada & Dhaqanka** ayaa sameeyey sare u kac sanadle ah oo gaaraya 29.22 boqolkiiba **Oktoobar** 2024. Sare u kaca ugu badan waxaa sababay qiimaha Maqal & Muuqal, Sawir iyo Macluumaadka oo u gaaray (+33.43 boqolkiiba).
- **Dharka & Kabaha** ayaa la diiwaan galiyey sare u kac sanadle ah oo dhan 23.62 boqolkiiba Oktoobar 2024. Sare u kaca ugu badan ayaa ka yimid qiimaha Dharka (+24.62 boqolkiiba), sare u kaca waxaa sababay Dharka caruurta (+92.30 boqolkiiba).
- **Agabka Guryaha, Qoyska & Dayactirka** ayaa laga diiwaan galiyey sare u kac sanadle ah oo dhan 22.54 boqolkiiba **Oktoobar** 2024. Sare u kaca ugu badan ayaa ka yimid qiimaha Agabka Guriga iyo Farsamadooda, Rogaga iyo Daboolka kale ee Dabaqa (+27.72 boqolkiiba).
- **Gaadiidka** ayaa sameeyey sare u kac sanadle ah oo gaaraya 19.08 boqolkiiba Oktoobar 2024. Sare u kaca ugu badan waxaa sababay qiimaha lagu iibsado Gawaarida oo gaaray (+26.97 boqolkiiba).
- **Alaabaha yaryar & Adeegyada** ayaa sameeyey sare u kac sanadle ah oo gaaraya 18.08 boqolkiiba Oktoobar 2024. Sare u kaca ugu badan waxaa sababay qiimaha saameeyey shaqsiyada oo gaaray (+21.76 boqolkiiba).
- **Cafimaadka** ayaa la diiwaan geliyey sare u kac sanadle ah 3.31 boqolkiiba, bishii Oktoobar 2024. Sare ugu badan ayaa ka dhashay qiimaha Adeega Caafimaadka (+20.00 boqolkolkiiba).


Qeybaha ugu weyn ee Sicirkoodu Hoos u dhacay Bishii Oktoobar 2024 (-)

- **Tubaakada** ayaa la diwaangaliyey hoos u dhac sanadle ah oo gaaraya -15.41 boqolkiib bishii Oktoobar 2024. Hoos u dhaca ugu badan ayaa ka yimid tubaakada (- 30.77 boqolkiiba).
- **Tacliinta** ayaa sameeyey hoos u dhac sanadle ah -6.15 boqolkiiba bishii Oktoobar 2024. Hoos u dhaca ugu badan ayaa ka yimid qiimaha warbarashada ee dugsiga sare ka danbaysa (- 12.60 boqolkiiba).
- **Kirada Guryaha & korontada** ayaa sameeyey hoos u dhac sanadle ah -3.05 boqolkiiba bishii Oktoobar 2024. Hoos u dhaca ugu badan ayaa ka yimid qiimaha korontada, gaaska iyo shidaalka kale (-14.64 boqolkiiba).

B. Qeybaha ugu waa weyn ee qeybaha kala duwan ee saameeya isbedelka bilaha ah ee TSB –da

Jaantuska 2: TSB; Isbedelka Sicirbararka ee bilaha dhamaan qeybaha; Oktoobar 2024

(Dec 2014 = 100)



Qeybaha ugu weyn ee Sicirkoodu kordhay Bisha Octoobar 2024(+)

- **Isgaarsiinta** ayaa sameeyey sare u kac Bille ah 25.81 boqolkiiba bishii Oktoobar 2024. Sare u kaca ugu badan ayaa ka yimid qiimaha telefoonka iyo qalabka telefax (+30.58 boqolkiiba).
- **Agabka Guryaha, Qoyska & Dayactirka** ayaa laga diiwaan galiyey sare u kac Bille ah oo dhan 2.46 boqolkiiba Oktoobar 2024. Sare u kaca ugu badan ayaa ka yimid qiimaha Agabka Guriga iyo Farsamadooda, Rogaga iyo Daboolka kale ee Dabaqa (+3.48 boqolkiiba).
- **Gaadiidka** ayaa sameeyey sare u kac bille ah oo gaaraya 2.11 boqolkiiba Oktoobar 2024. Sare u kaca ugu badan waxaa sababay qiimaha adeegsiga Gawaarida oo gaaray (+2.90 boqolkiiba).

Qeybaha ugu waaweyn oo sicirkoodu hoos u dhacay(-)

- **Tubaakada** ayaa la diwaangaliyey hoos u dhac bille ah oo gaaraya -3.64 boqolkiib bishii Oktoobar 2024. Hoos u dhaca ugu badan ayaa ka yimid tubaakada (- 6.25 boqolkiiba).
- **Alaabaha yaryar & Adeegyada** ayaa sameeyey hoos u dhac bille ah oo gaaraya -3.63 boqolkiiba Oktoobar 2024. Hoos u dhaca ugu badan waxaa sababay qiimaha saameeyey shaqsiyada oo gaaray m (-6.50 boqolkiiba).

- **Maqaayadaha & Hoteelada** ayaa sameeyey hoos u dhac bille ah -2.86 boqolkiiba bishii Oktoobar 2024. Hoos u dhaca ugu badan ayaa ka yimid adeegyada cuntada (+3.96 boqolkiiba).

Shaxda 2: Isbedelka tusaha sicirka ee qeybaha badeecadaha Oktoobar 2024 ee habka (COICOP)

Habka kalasaarida caalamiga ee COICOP	TSB Weight	Oktoobar 2023 TSB	Sebteembar 2024 TSB	Oktoobar 2024 TSB	% Boqolkii ba Bishan iyo Bishii hore	% Boqolkiiba Isbedelka Sanadkii Hore iyo Sanadkaan
Dhamaan Qeybaha TSB-da	100.00	143.59	151.39	151.96	0.37	5.83
Cuntada & Cabitaanada	46.04	140.43	142.54	141.28	-0.89	0.60
Tubaakadda	1.25	167.33	146.90	141.55	-3.64	-15.41
Dharka & Kabaha	5.03	169.52	208.96	209.57	0.29	23.62
Guryaha, Biyaha, Korontada, Gaaska & Shidaalka Kale	23.41	148.05	145.41	143.53	-1.29	-3.05
Agabka Guryaha	2.93	117.61	140.66	144.12	2.46	22.54
Caafimaadka	5.00	182.78	188.42	188.84	0.22	3.31
Gaadiidka	3.77	121.85	142.10	145.10	2.11	19.08
Isgaarsiinta	2.80	161.02	232.47	292.46	25.81	81.63
Hawo Bedeleshada & Dhaqanka	1.00	104.30	137.29	134.77	-1.84	29.22
Tacliinta	4.00	116.95	109.75	109.75	0.00	-6.15
Maqaayadaha & Hoteelada	2.00	145.78	205.92	200.03	-2.86	37.21
Alaabaha Yaryar & Adeegyada	2.77	120.52	147.66	142.31	-3.63	18.08

Ogeysiis:

Tusaha Sicirka Badeecadaha waa sahan ku saabsan badeecadaha iyo adeegyada ay isticmaalaan goysaska caadiga ah. Xogta sahanka waxaa la soo ururiyaa Todobaadka koowaad iyo kan sedexaad ee bilkasta. Sicirka badeecadaha iyo adeegyada waxaa laga soo ururiyaa goobaha ganacsiga ee afarta suuq ee ugu waa weyn Magaaladda Muqdisho.


Soosaarida tan xigta

Tixraaca Sicirka Badeecadaha (TSB), Oktoobar, 2024 waxaa la baahin doonaa 15 Nofeembar, 2024. Wixii faahfaahin intaasi dheer ee ku saabsan (TSB) iyo xogaha kale ee rasmiga kala soco Xafiiska Istaatistiskada, Fadlan booqo Bogeena rasmiga ah ee <http://www.nbs.gov.so>

Lifaaqa 1aad: Dhamaan Qeybaha 'TBS' – qeybaha ka qeyb qaata heerka sicir-bararka bishii Oktoobar 2024 marka loo eego COICOPka

Dhamaan qeybaha TSB-da

Qeybaha ka qeybqata (%) heerka sicir bararka (COICOP)



Isha Xogta: NBS

Lifaaqa 1aad wuxuu bixiyaa falanqeyn kusaabsan heerka sicir bararka ee Bishsa oo loo qeybiyey iyo is barbardhiga qeybaha, ayada oo loo eegayo qeybaha COICOP loona soo bandhigayo sida ay u kalasaameyn badan yihiin (ka qeyb qaadashooda) dhamaan qeybahaha 'TSB' ka.

War bixin bileedka bisha **Oktoobar 2024** (TSB) iyo faahfaahinta xili waqtiyeedka xogta ayaa lagu baahiyaa, websiteka Hay'adda Istaatistikada Qaranka Soomaaliya. <http://www.nbs.gov.so> Twitter: @NBS_somalia